# Khayraadka: Xaaladaha Nolol wadaaga

English | Español | Lus Hmoob | Русский | ကညီ

**Bogga lasoo dhigay:** 1/20/22

Nolol wadaagu waa qaab nololeed ku dhisan xariir kaasoo si taxadar leh ugu daraaya qof qaangaar ah oo gaaray 18 sano ama ka wayn oo naafo ah qof ama qoys la wadaagi doona nolosha iyo khibradaha kana taageeri doona qofka adeegsiga farsamooyinka qofka diirada saaraaya. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan nolol wadaaga, fiiri CBSM – Hanaanka isku aadinta nolol wadaaga iyo dookhyada taageerada socota.

Boggaan waxaad ka helaysaa tusaaleyaasha sida qorshaynta nolol wadaaga u shaqayn karaan iyo waxa laga filan karo hawsha qorsheynta. Xogta ayaa caawin karta dadka naafada ah, qoysaskooda, maareeyaasha kiiska iyo adeeg bixiyaasha.

DHS waxay dhiiri gelinaysaa adeegsiga hal abuurnimada, fikirka toganiyo farsamooyin diirada saaraaya qofka marka la raadinaayo waxa ugu haboon dadka danaynaya qorshaha nolol wadaaga.

## Tusaale 1: Carlos

### Kahor guuridda

Carlos waa 23 jir wuxuuna leeyahay dhoola-cadayn qurux badan. Wuxuu aad u jecel yahay la kulanka dadka iyo inuu barto waxyaabaha ay xiiseeyaan. Wuxuu taageero ka helaa Qarash dhaafka Naafada Kobaca (DD) wuxuuna ku nool yahay xarunta la dagan yahay ee bulshada (CRS) waxaana la dagan sadex qof qolka.

Carlos wuxuu danaynayaa inuu raadiyo meel kale oo uu ku noolaado. Qoyska iyo kooxda Carlos ayaa taageero ka siinaaya sahaminta dookhyadiisa, waxay sidoo kale ka walaacsan yihiin inuu helaayo cadadka saxda ah ee taageerada.

### Qorshaynta guuridda

Maareeyaha kiiska Carlos ayaa xog ka helay MinnesotaHelp.info taasoo la xariirta wakaalada nolol wadaaga oo ka caawisa dadka inay helaan shaqsiyaad iyo qoysaska siinaaya taageero lagu bixinaayo qorsheyaasha nolol wadaaga. Carlos iyo qoyskiisa ayaa la xariiray wakaalada, maareeyaha kiiska ayaa ogolaaday in lagula heshiiyo wakaalada inay biloowdo qorshaha isku aadinta ayadoo adeegsanaysa tababarka qoyska iyo adeegga qarash dhaafka talo siinta (ka fiiri CBSM – Talo Bixinta iyo Tababarka Qoyska). Waxay wakhti la qaateen wakaalada nolol wadaaga si looga doodo waxa muhiimka ah in uu sameeyo loona sameeyo Carlos iyo waxay uga dhignaan karto Carlos in uu ku noolaado Carlos qaabka nolol wadaaga ah.

Inta lagu jiray wada hadalka wakaalada nolol wadaaga, Carlos ayaa sheegay inuu jecel yahay banaanka inuu wareego oo gaar ahaan uu ag joogo harada. Carlos ayaa ka hadlaaya sida uu ugu qaatay waqtigii carruurnimadiisa hudheelka ayeeydiis iyo awoowgiis, asagoo tagaya hadba guri lana hadlaaya dariska iyo saaxiibada. Wakaalada wadaaga nolosha ayaa ogaaday in Carlos uu leeyahay hibo qarsoon—waa qof hadal badan oo xiisaynaaya inuu ogaato meesha dadku ka kaluumaystaan iyo noocyada kaluunka ay soo qabtaan.

Wakaalada nolol wadaaga ayaa aruurisay xog ka caawinaysa Carlos inuu abuuro sharaxaada halka bog ah iyo qeexitaan diirada saaraaya qofka. Agabkaan waa kuwo ku salaysan cadayn waxayna ka caawinayaan dadka kale inay fahmaan awoodihiisa, rajooyinkiisa, riyooyinkiisa iyo waxyaabaha guud ee muhiimka u ah asaga iyo xaaladiisa. Wakaaladahaan nolol wadaaga ayaa sidoo kale adeegsanaya aalada isku aadinta si loo fahmo sifooyinka shaqsiyadiisa iyo si wax looga ogaato ruuxiyaadkiisa iyo hawlihiisa joogtada ah. Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan agabkaan, arag Bulshada Waxbarashada ee Farsamooyinka Qofka Diirada Saaraaya.

### Helitaanka qoyska

Wakaaladaha nolol wadaaga ayaa markasta raadiya inay helaan shaqsiyaadka iyo qoysaska doonaaya inay gurigooda iyo noloshooda la wadaagaan qofka naafada ah. Shaqaale heegan ah ayaa sahaminaaya isku aadinta suuragal ah ayagoo eegaaya danaha wadaaga ah iyo meelaha dadku jecel yihiin inay ku noolaadaan.

Carlos ayaa ku koray Owatonna, MN, waalidkiis iyo ilmaha la dhashay ayaana wali ku nool meeshaas. Wakaalada nolol wadaaga ayaa diirada ku saaraysa raadinteeda aagaas. Ayadoo

adeegsanaysa shakabad dad ah oo ku nool kana shaqeeya aaga Owatonna, wakaalada nolol wadaaga ayaa heshay Nancy iyo Ralph, lamaane carruurtoodu dhawaan u guureen kuleejka.

Wakaalada nolol wadaaga ayaa u sharxaysa qorsheyaasha nolol wadaaga Nancy iyo Ralph. Qoys nolol wadaag ah ahaan, Nancy iyo Ralph ayaa masuul ka noqon doona inay taageeraan qof ayna ku daraan nolol maalmeedkooda. Nancy iyo Ralph ayaa xiiseynaaya fursadaan, marka wakaalada nolol wadaaga ayaa dood diirada saaraysa qofka la samaysay labadooda si ay xog u aruuriso.

Wakaalada nolol wadaaga ayaa ogaatay in Nancy iyo Ralph ay daganaayeen Owatonna dhammaan intay noolaayeen. Gurigooda ayaa meel loo lugayn karo u jira laamiga weyn. Wuxuu leeyahay sadex qol oo jiif, jiko buuxda iyo aaga jikada oo dheeraad ah oo ku yaala salka guriga. Wakaalada nolol wadaaga ayaa sidoo kale ogaatay in Nancy iyo Ralph ay aqal yar ku leeyihiin waqooyiga Minnesota kaasoo ay si joogto ah u booqdaan.

Ayadoo la adeegsanaayo hanaankaan, Carlos, Nancy iyo Ralph ayaa ogolaaday inay kulmaan.

### Carlos, Nancy iyo Ralph ayaa kulmay

Wakaalada nolol wadaag ayaa diyaarinaysa kulanno kaladuwan waxayna si taxadar leh u bilaabaysaa hanaanka dhisida xariirka ee u dhexeeya Carlos, Nancy iyo Ralph.

Inta lagu jiro sadexda bilood ee soo socda, Carlos, Nancy iyo Ralph ayaa ku kulmaaya dukaannada kafeega ee deegaanka, guriga iyo aqalka nasiinada ee Nancy iyo Ralph, guriga hadda uu joogo Carlos, bandhiga farshaxanka iyo tiyaatarka filimaanta. Carlos ayaa xataa habaynkii la seexday Nancy iyo Ralph dhawr jeer. Nancy iyo Ralph ayaa ku casuumay qaraabadooda iyo saaxiibada dhawr kamid ah kulanadaan. Carlos ayaa sidoo kale casuumay saxiibadiis iyo dadka kale oo taageerada siiya.

Inta lagu jiro hawshaan xariir dhisida, wakaalada nolol wadaaga ayaa ka caawinaysa Carlos, Nancy iyo Ralph inay ka wada hadlaan:

- Waxyaabaha uu jecel yahay, rajooyinka, riyooyinka iyo waxa muhiimka u ah iyo waxa uu rabo Carlos
- Waxyaabaha ay jecel yihiin, rajooyinka, riyooyinka iyo waxa muhiimka u ah iyo waxa ay rabaan Nancy iyo Ralph.
- Shaqooyinka iyo waxyaabaha ay dhammaan jecel yihiin inay sameeyaan
- Jadwalka maalinlaha ah ee qof kasta
- Waxa qof kasta u baahan yahay si uu u helo caafimaad iyo badqab
- Meelaha qof kasta uu horay u tagay iyo meelaha uu doonaayo inuu booqdo
- Waxay maalin wacan iyo maalin xun uga dhigan tahay qof kasta
- Miisaaniyada guriga iyo masuuliyadaha qof kasta
- Dookhyada taageerada lacagta lagu baxsho iyo qorshaha shaqaalaha dheeriga ah
- Heshiis kiro oo labada dhinac ku heshiiyaan.

Inta lagu jiro mudada sadexda bilood ah, Nancy iyo Ralph ayaa helaaya tababar ku aadan farsamooyinka diirada saaraaya qofka, taageero toos ah iyo taageerooyin togan. Wakaalada nolol wadaaga ayaa sidoo kale qiimayn shaqsiyadeed ku samaynaysa labadaba Nancy iyo Ralph (ka fiiri DHS – Qiimaynada shaqsiyada si aad u hesho xog dheeraad ah).

Kahor guurista, wakaalada nolol wadaaga ayaa kala hadlaysa qayb kamid ah kharashka adeegyada deegaanka qoyska Nancy iyo Ralph, oo gaar u ah taageerada ay u baahan yihiin ee la xariirta dhammaan shaqooyinka iyo masuuliyada 245D ee la xariira qorshaha taageerada Carlos.

Wakaaladaha hogaanka ayaa qiimaynaysa kharashka adeegyada hooyga ee qoyska ayadoo gelinaysa xog lagu saleeyay baahiyaha lagu qiimeeyay Carlos. Qiimaha adeegyada hooyga qoyska waa inay waafaqaan xeerarka ganacsiga ee xarumaha adeegyada deegaanka qoyska. Wakaalada nolol wadaaga ayaa sidoo kale ka caawinaysa Nancy iyo Ralph in gurigooda ay ruqsad siiso degmada ay dagan yihiin.

### Maalinta guuridda

Nancy iyo Ralph ayaa go'aaminaaya inay gurigooda u ogolaadaan Carlos, halka Carlos uu ka go'aansanaayo inuu aqbalo yaboohooda.

Wakaalada hogaanka:

- Waxay buuxinaysaa Xogta Kooban ee Qorshaha Guuridda, DHS-3936) (arag CBSM – Xogta Kooban ee Qorshahayga Guuridda si aad u hesho xog dheeraad ah)
- Waxay xisaabinaysaa ayna ogolaanaysaa qiimaha adeegyada kirada guriga si wakaalada nolol wadaaga ay u bixin karto maal gelinta (arag CBSM – Adeegyada guriga qoyska iyo CBSM – Hanaanka nolol wadaaga iyo dookhyada taageerada socota si aad u hesho macluumaaad dheeraad ah).

Maalinta guuridda, wakaalada nolol wadaaga ayaa kala shaqaynaysa Carlos iyo kooxdiisa taageerada inuu alaab xirxirto, uu guuro uuna iibsado agabka uu ugu baahan yahay gurigiisa cusub.

### Labo bilood kadib guuridda

Kadib marka Carlos uu u guuro guriga Nancy iyo Ralph, wakaalada nolol wadaaga ayaa booqanaysa asbuuc kasta si ay u hubiso xaalada Carlos iyo qoyskiisa cusub ee nolol wadaaga. Xadkaan ayaa kordhi kara ama hoos u dhici kara muddo kadib, ayadoo lagu salaynaayo baahiyaha Carlos.

Carlos ayaa marhore booqday guriga xiliga fasaxa marar kaladuwan. Ma joojin karo ka hadalka dhammaan dadka uu la kulmay iyo sida uu u xiisaynayo inuu booqdo guriga xiliga fasaxa inta badan dhammaadka asbuuc kasta. Wuxuu sidoo kale ka hadlaa la shaqaynta Ralph si uu uga caawiyo jarista cawska iyo shaqada fagaaga.

Wakaalada nolol wadaaga ayaa ku xirnaan doonta kooxda taageerada ee Carlos, kuwaasoo ay ku jiraan qoyskiisa, maareeyaha kiiska iyo qoyska nolol wadaaga. Nancy iyo Ralph ayaa sheegaaya sida shaqsiyada Carlos ay u ifisay noloshooda. Ma aamini karaan tirada dadka Carlos ay isku barteen gurigooda xiliga fasaxa iyo xaafadooda. Carlos ayaa hadda qayb ka ah qoyska.

## Tusaale 2: Sally

### Kahor guuridda

Sally waa 50 sano jir, waxayna caan ku tahay naxariisteeda. Waxay jeceshahay kala sheekaysiga kubada bayska qof kasta oo taageera ah waxayna taqaanaa ku dhawaad naadi kasta oo Kubada bayska ee Horyaallada Wayn. Sally waxay qabtaa dhaawaca maskaxda, qalal iyo sonkoroow. Waxay ku nooshahay guri ku yaala Minneapolis, MN, ayadoo ay jiraan taageerooyin laga heli karo qaybaha dhismaha oo lagu baxsho Barnaamijka Kaalmada Dhaawaca Maskaxda (BI).

Sally waxaa dhib ku ah inay maarayso daawooyinkeeda, shaqaalaha ayaana dhib ku qaba inay fahmaan ayna ilaaliyaan jadwalkeeda subixii. Sally waxay jeceshahay inay seexato ilaa 8 subaxnimo maalin kasta, laakiin shaqaalaha Sally ayaa dhameeya shaqadooda 5 a.m, Xubnaha shaqaalaha ayaa iskudaya inay toosiyaan 5 a.m. si ay u laqdo daawadeeda, taasoo abuurta dagaal aan xal loo heli karin. Guriga ay kiraysay wakaalada adeegga ayaa ka codsaday Sally inay guurto wuxuuna sidoo kale usoo saaray ogeysiiska joojinta adeegga.

Sally ayaa doonaysa meel ay keligeed degto ayna ka hawo baddalato meeshaan. Waxay go'aansatay inay u guurto gurigeeda, laakiin shaqaalaheeda ayaa wali fahmi la' ayada. Shaqaalaha loo mudeeyay inay Sally la shaqeeyaan ayadoo joogta gurigooda ayaan ahayn kuwo joogto ah, waxayna waajahaysaa isbadello badan oo dhanka shaqaalaha ah. Sally ayaa ku dhamaatay in isbitaal loo dhigo dhibaatooyin la xariira qalalka iyo sonkoroowga. Ugu danbayn, waxay u guurtay xarunta baxnaaninta kadib markii ay dhacday kadib markii xanuunka sonkortu ku kacay.

Sally ayaa aad ugu dhow saaxiibteed, Bianca, waxayna ku tiirsan tahay taageeradeeda ay u gaarto go'aanno. Sally iyo Bianca ayaa ka sheekaystay talaabooyinka xiga laakiin ma hubaan dookhyada mudada fog oo ku taageeraaya ayada meesha ay doonayso ayna amaan ku helayso.

### Qorshaynta guuridda

Saaxiibka qoyska ayaa helay wakaalad ka caawisa dadka inay ku xirmaan shaqsiyaadka iyo qoysaska taageerada ku baxsha qorshaha nolol wadaaga. Fikirkaan ayaa hami galisay Sally iyo Bianca, si ay ula xariiraan wakaalada. Maareeyaha kiiska ee Sally ayaa ogolaaday in lagula heshiiyo wakaalada inay biloowdo qorshaha isku aadinta ayadoo adeegsanaysa tababarka qoyska iyo adeegga qarash dhaafka talo bixin (ka fiiri CBSM – Talo Bixinta iyo Tababarka Qoyska).

Wakaalada nolol wadaaga ayaa mudaynaysa waqti ay la qaadato Sally iyo Bianca si loola yeesho wada hadal qofka diirada lagu saaraayo. Wakaalada nolol wadaaga ayaa bilaabaysa wada hadal diirada lagu saaraayo su'aal gaar u ah Sally. "Maxay dadku kugu jecel yihin kuguna qadariyaan?" Sally ayaa ku jawaabtay inaan qofna waligeed waydiin su'aashaas. Waxay kadibna iloowday inay ka

hadasho sida ay u jeceshahay kubada baseball-ka sida ay u jeceshahay ku shaqaynta aalada elektarooniga ah iyo kumbuyuutarrada.

Wakaalada nolol wadaaga ayaa marta shaqo aasaasi ah si ay wax uga ogaato waxa u shaqeeyay iyo waxa aan ugu shaqayn goobaha ay horay ugu noolayd Sally.

Maxaa kuu shaqeeyay?

- Waxay ku nooshahay Minneapolis, meel dhawr guri u dhexayso guriga walaasheed Bianca.
- Gurigeeda ayaa u dhawaa wadada baska ee u dhow fiyaalaha Minneapolis iyo Target Field, halkaasoo kooxda kubada baseball-ka ee Minnesota Twins ay ku ciyaaraan.
- Waxay haysataa aageeda gaarka ah oo ay ku isticmaali karto kumbuyuutar iyo dhammaan agabkeeda gaarka ah.
- Waxay awooday inay xanaanayso bisad ay jeceshahay.

Maxaan u shaqayn?

- Waxay waajahday isbadellada xad dhaafka ah ee shaqaalaha waxayna u baahatay inay tababarto shaqaale cusub marar badan.
- Waxay waajahday dagaal dhanka shaqaalaha marka ay raaci waayeen jadwalkeeda maalinlaha ah.
- Shaqaalaha ayaan aaminsanayn inay u qaadan karto daawada si iskeed ah.
- Shaqaalaha ayaan siin tababar iyo hawlaha xirfad dhisida ah si loo kordhiyo madax banaanideeda, ayna ku jiraan sida ay u cunayso daawadeeda.
- Waxay lumisay gurigeeda sababo la xariira dhibaatooyinka ka jira daawooyinkeeda, waxaana isbitaalka la dhigay muddo dheer.
- Xubnaha shaqaalaha ayaan fahmin dhaawaca ku dhacay maskaxdeeda.
- Xubnaha shaqaalaha ayaan aaminin inay awoodo inay hesho shaqo sabab la xariirta dhibaatooyinkeeda caafimaadka waxayna aamineen inaysan amaan ahaan doonin.

Wakaalada nolol wadaaga ayaa kala hadashay fikirka qorshaha nolol wadaaga Sally iyo Bianca. Waxaa soo jiiday fikirka ah inuu jiro qof ama qoys gurigooda u furaaya, taageero sinaaya kuna daraaya Sally noloshooda.

### Helitaanka qoyska

Inta lagu jiro asbuuca xiga, wakaalada nolol wadaaga ayaa ka heshay sadex qof/qoys oo hawshaas geli kara gudaha Minneapolis.

**Hooyga 1:** Betty iyo Dave ayaa aad u yaqaana qorsheyaasha nolol wadaaga. Waxaa jiray qof ay hayeen oo gurigooda ka guuray dhawaan oo guri iskiis ah dagay. Waxay khibrado sanado kaladuwan ah u leeyihiin taageerista qof qaba dhaawaca maskaxda. Waxay ku nool yihiin koonfurta Minneapolis, oo aan aad uga fogayn meesha ay Sally rajaynayso inay degto.

**Hooyga 2:** Judi iyo Cal ayaa ku nool bartamaha Minneapolis. Waxay leeyihiin labo wiil oo jira 10 iyo 12, waxayna leeyihiin guri gaar ah oo ka garab dhisan gurigooda. Cal waa macalin waana tababaraha kubada baseball-ka ee Dugsiyada Dadwaynaha ee Minneapolis (Minneapolis Public Schools) wuxuuna sidoo kale la dheelaa kubada softball saaxiibadiis inta lagu jiro xagaaga. Judi ayaa jecel beeridda iyo gasacadaynta khudaarta si loo isticmaalo bilaha qaboobaha. Sidoo kale waxay agaasimaha fulinta ka tahay urur khayri ah oo maxali ah oo adeegyo siiya dadka bilaa hooyga ah.

**Hooyga 3:** Jeff ayaa leh guri sadex dabaq ah oo ku xiga dukaankiisa gaariyaasha oo ku yaala xaafada Powderhorn Park ee Minneapolis. Guriga sadexda dabaq ah ayaa shan guri ka xiga guriga Bianca. Jeff waxaa gurigiisa kiro kula dagan, Elijah, kaasoo dhismaha daganaa 20 sano ahna xirfadlaha IT ga ee iskiis u shaqaysta. Elijah wuxuu taageero IT siiyaa dukaanka gaariyaasha ee Jeff, waxayna badanaa cuntada ku dubtaan banaanka guriga.

Wakaalada nolosha ayaa la kulantay dhammaan sadexda qoysba si ay u aruuriso xog. Sally ayaa ku qanacday dhammaantood, marka waxay go'aansadeen inay wacaan si ay u waydiiyaan dhawr su'aalood oo wakaalada nolol wadaagu ka caawisay dhisidooda. Dhammaan qoysaska ayaa doonaayay inay la kulmaan Sally kadib markii ay la sheekaysteen. Sally iyo Bianca ayaa aad u xiisaynaaya inay la kulmaan Judi, Cal iyo wiilashooda waayo Sally ayaa leh walaalo yaryar waxayna jeceshahay carruurta.

Sally ayaa labo bilood la joogaysa si ay u barato Judi iyo Cal ayadoo la cashaynaysa, u raacaysa bandhiga farshaxanka ee maxaliga ah, ka qaybgalaysa ciyaarta kubada baseball-ka ee Minnesota Twins habaynkana ku dhaxaysa gurigooda si ay u fahanto sida ay tahay nolosha gurigu. Sally, Judi, Cal iyo wiilashooda ayaa ku qancay inay iskudayaan nolol la wadaagista qof cusub.

Intii hawshaan lagu jiray, Judi, Cal, iyo kooxda Sally iyo wakaalada nolol wadaaga ayaa abuuray heshiiska qandaraaslaha nolosha madaxa banaan ee ku aadan masuuliyadaha qoyska. Kadib markii dhammaan dhinacyadu akhriyeen ayna saxiixeen heshiiska, waxay ku darsadeen taariikhda soo guurista jadwalkooda.

Kahor guurista, wakaalada nolol wadaaga ayaa kala hadlaysa qayb kamid ah kharashka adeegyada deegaanka qoyska, oo gaar u ah taageerada ay u baahan yihiin ee la xariirta dhammaan shaqooyinka iyo masuuliyada 245D ee la xariira qorshaha taageerada Sally. Wakaaladaha hogaanka ayaa qiimaynaysa kharashka adeegyada hooyga ee qoyska ayadoo gelinaysa xog lagu saleeyay baahiyaha lagu qiimeeyay Sally. Qiimaha adeegyada hooyga qoyska waana inay waafaqaan xeerarka ganacsiga ee xarumaha adeegyada deegaanka qoyska. Wakaalada nolol wadaaga ayaa sidoo kale ka caawinaysa Judi iyo Cal in gurigooda ay ruqsad siiso degmada ay dagan yihiin.

### Maalinta guuridda

Marka Sally, Judi iyo Cal ay go'aansadaan taariikhda guuridda, wakaalada hawsha hagaysa:

- Waxay buuxinaysaa Xogta Kooban ee Qorshaha Guuridda, DHS-3936) (arag CBSM – Xogta Kooban ee Qorshahayga Guurista si aad u hesho xog dheeraad ah)
- Waxay xisaabinaysaa ayna ogolaanaysaa qiimaha adeegyada kirada guriga si wakaalada nolol wadaaga ay u bixin karto maal gelinta (arag CBSM – Adeegyada guriga qoyska and CBSM – Hanaanka nolol wadaaga iyo dookhyada taageerada socota si aad u hesho macluumaaad dheeraad ah).

Wakaalada nolol wadaaga, Bianca, Judi iyo Cal ayaa ka caawinaaya Sally inay kusoo guurto guriga dheeriga ah ee Judi iyo Cal. Sally ayaa xor u ah guriga reerka oo dhan, laakiin waxay ku faraxsan tahay inay haysato qol u gaar ah, aaga nolosha iyo jiko yar. Gurigeeda cusub ayaa ah mid degan wuxuuna leeyahay muuqaal macaan. Waxay ku faraxsan tahay inay la noolaato qoyska.

### Labo bilood kadib

Sally ayaa ka heshay kalsoonida iyo qadarinta ay doonaysay Judi iyo Cal. Sally ayaa sidoo kale shaqo ka heshay walaalka Cal, oo qurxiya muuqaallada guriga una badella DVD-yo. Sally ayaa u lugayn karta gurigiisa yar, kaasoo dhawr guri u jira gurigeeda. Waxay ka caawisaa wax ka badelka muuqaallada iyo wicitaannada macaamiisha marka dalabaadkoodu diyaar yihiin. Wakaalada nolol wadaaga ayaa sii wadaysa inay siiso taageero joogto ah inta Sally, Judi iyo Cal ay si fiican isku baranayaan.